

## Kor U qaadista Tilmaamaha Barnaamijkaaga Gaadiidka

### Guudmarka Barnaamijka

Wakaalada Gaadiidka waxaa farxad u ah inay ku dhawaaqdo inay furayso Barnaamijka Electrify Your Fleet si loo dhiiri geliyo gaariyaasha korontada ku shaqeeya loona yareeyo saamaynta cimilada ee gaadiidka ganacsiga, magaallada, iyo kuwa haayadaha khayriga ah. Barnaamijkaan caawimaada ah ayaa ka caawinaaya mulkiileyaasha ganacsiyada inay maal geliyaan badelida gaariyaashii matoorka ku shaqeeya (ICE) looguna badelo gaaritaasha korontada ku shaqeeya (EVs) ama iska ilaaliyaan gaariyaasha ICE oo lagu daro gaadiidkooda. Ayadoo lagu dhafay kaalmooyinka federaalka, gobalka, iyo adeegga korontada, mulkiileyaasha gaadiidka ee u qalma ayaa fursad u helaaya inay badbaadsadaan kumanaan doolar si ay u helaan dookhyada gaadiidka nadiifta ah.

### U qalmida

Barnaamijkaan deeqda oo dhan \$500,000 ayay heli karaan dhammaan mulkiileyaasha gaadiidka ka diiwaan gashan Vermont ee ganacsiga, magaallada, iyo kuwa khayriga ah.

Abaal marinnada ayaa lagu bixin doonaa qaab qarash celin ah oo dhan \$2,500 gaari kasta oo ICE ah oo la badelay ama laga saaray shaqada ayadoo la ogol yahay ugu yaraan 20 caawimaadood calaa raxantii gaadiid ahba inta barnaamijku jiro. Ururada gaadiidka ee khayriga ah ee siinaaya dadka reer Vermont dookhyada gaadiidka ayaa u qalma ilaa 5 lacagta kaalmada ah oo la kordhiyay oo dhan \$5,000 oo dheeri ku ah ilaa 15 caawimaadood oo caadi ah oo lagu helaayo \$2,500.

Maal gelintaan ayaa lagu dabiqi karaa iibsashada ama kireysiga Gaariyaasha Korontada ku Shaqeeya (PEVs) ama dookhyada kale ee gaadiidka u qalma ayna ku jiraan baaskiillada korontada, baaskiillada korontada ku shaqeeya ee alaabta qaada, baaskiillada korontada ee la wado, mootooyinka korontada ah, ama gaadiidka barafka ee korontada ku shaqeeya.

Codsadeyaashu waa inay muujiyaan in gaariga la maal gashay uu qayb ka noqonaayo yareynta gaaska wasaqeeya hawada.

Dhammaan gaariyaasha lasoo iibsaday ama lagu kireystay barnaamijkaan kaalmada ah waa inuu haystaa codsaduhu ugu yaraan labaatan iyo afar (24) bilood dedaallo macquul ahna waa in la sameeyo si dib looga iibsho gaariyaashaan shirkadaha gaariyaasha iibiya ee qaybta ka ah Barnaamijka MileageSmart, barnaamijka u qalma kaalmada dakhliga ee Vermont ee gaariyaasha la isticmaalay.

## Hanaanka Codsiga

Si aad u codsato Barnaamijka Electrify Your Fleet, mulkiileyaasha gaadiidku waa inay buuxshaan foomka codsiga ee oonlaynka ah. Codsiyada waxaa eegi doona gudi ka kooban shaqaalaha Wakaalada Gaadiidka. Codsadeyaasha waxaa intaas kadib lagula soo xiriirayaa wicitaannada baaritaanka si loo xaqijiyo u qalmida loona baxsho dukumiintiyo cadeyn ah. Dhammaan codsadeyaasha waxaa lagu boorinayaa inay si taxadar leh u akhriyaan Ogeysiiska Fursada Maalgelinta (NOFO), Tilmaamaha Barnaamijka, iyo khayraadka dheeriga ah ee la heli karo si ay gacan uga gaystaan taageerista iyo maal gelinta dedaallada koronto u badelida gaadiidka oo laga heli karo [webseedka Wakaalada Gaadiidka.](#)

*Haddii aadan ku hadlin Ingiriis aadna u baahan tahay caawimaada turjumaada, fadlan la xiriir shaqaalaha Wakaallada Gaadiidka adoo iimeel u diraaya [AOT.climate@vermont.gov](mailto:AOT.climate@vermont.gov) si laguugu xiro adeegyada turjumaanka iyo fasiraada Gobalka. Fadlan noo reeb magacaaga, lambarka taleefanka, iyo ciwaanka iimeelka si aan kuugu xiriirino turjumaan inta lagu jiro saacadaha shaqada 8:00am-4:30pm.*